Warbixinta guud ee kusaabsan doorashada waxbarashada dugiyada sare.

Halkan waxaanu isugu soo uruurinay waxyaalo farabadan, oo faaído badan kuu leh, doorashooyinka waxbarashadeed ee aad doorandoontid, raadi wax yaala saxa ah! Haddii aad Suáalooyin qabtid na waad soo gudbinkareysaa, isuna meeldhig ama isu miisaan fursa daha kaladuwan ee jira.

Gaar ahaan Adiga.
Waxaad sameysataa oo aad qorataa waxa adiga gaar ahaan kuumihiim ah, usna eeg ama isu meeldhig wax uu iskuulku uu kuugu talagalay ee waxbarashadeed.Waxaa laga yabaa in aad wax kubaratid waxbarashada luqad gooni ah? Ama aad baratid isboortiyada midkamidah?ama aad shaqeysid kuna shaqeeysidna shaqooyinka jira mid ka mid ah? Dib ha u dhigan waxbarshooyin ka aad dooneysid in aad baratid daqii-qadaha u danbeysa, wakhtibalaadhan sii naftaada si aad u ogatid fursadaha kaladuwan ee waxbarashadeed ee kaladuwan ee jira.

Waxbarshooyinku waxa ay ka kooban yihiin.
Haddii aad dooratid waxbarasho aad xiisaynaysid in aad baratid, waxaa suurogal noqondoonta in aad heshid wax barashadaas. Si wanaagsan isaga eeg waxbarashooyinka waxa ay ka koobanyihiin, waxaanad iska hubsataa waxbarashooyinka aad mustaqbalka aad shaqooyinka aad ku heli kartid ama aad waxbarashadaada aad ku sii wadan kartid.

Waxbarashada
Haddii aad dooneysid in aaad waxabarashadaad aad sii wadatid kadib marka aad dugsiga sare aad dhameysatid, iska eeg waxbarashooyinka lagaarabo in aad buuxisid marka aad dooneysid in aad jaamacadaha dhigatid, waxaanad isu eegtaa,isuna meeldhigtaa waxbarashooyinka kaladuwan ee dugsiyadasare laga barto. Waxaa jira warbixno kaladuwan oo kusaabsan waxa looga baahanyahay ardayga marka uu doonayo in uu waxbarasho bilaabo. Waxaanad kehelikartaa cinwaanka ah utbildningsinfo.se. Gaar ahaan wakhtigan aynu kujirno oo ah mid aad u mihiim ah, sababta oo ah waxaa la sameeyey sharciyo cusub oo kusaabsan ardayda doonayasa in ay bilaabaan waxbarashooyin heer jaamacadeed ah. Laga bilaabo sanadka 2010.
Wixii kusaabsan sharciyada ardey qaadashada dugsiyada waxaad ka helikartaa
http://www.utbildningsinfo.se/sb/d/195/a/771

Shaqooyinka
Haddii aad dooneysid si deg-deg in aad suuqa shaqada aad u gashid-waxaad akhrisataa saadalaha suuqa shaqooyinka, ee laxidhiidha waxbarashooyinka dugsiyada sare. Halkaas oo aad ka qiyaas qaadan kartid sida uu naqon doono suuqa shaqadu mudooyinka nagu soo aadan, iyo qaybaha kaladuwan ee u baahan waxbarasho iyo aqoon aad u dheer si aad shaqo ugu heshid. Waxaad kaheli kartaa wixii intaas dheer boga internetka ee xafiiska shaqada ee u jiheenta shaqooyinka ama shaqooyinka banaan laga raadsado (arbetsförmedlingen)Waxaad kaloo aad eegtaa wareysiyada kala duwan ee aanu ka qaadnay islamarkaana weydiiney shirkadaha.
Laga bilaabo sanadkii 2008 waxaa socday tijaabooyin ah waxbarasho xirfado ah, kuwaas oo xidhiidh la leh u diyaargarowga xirfadaha waxbarashadeed.ku waas oo aad hawlgal balaadhankasameen doontid goobaha shaqooyinka in kabadan nusgelin ama maalin badhkeed. Waxaad weydiisaa iskuulka haddii aad helikareysid fursadahaas.waxaad kaloo ogaataa haddii uu iskuulku uu kuu helikaro goobo tababar xirfadeed ah, inta aad ku jirtid waxbarashada(APU).

Halkan waxaad ka heleysaa xidhiidhyo aad u mihiim ah iyo khibrado!
Noqo mid maskax furan, waxaadna doorataa tacliinta aad ku wanaagsantah ee aad kabixikartid.
Jiheenta shaqooyinka: http://yrkeskompassen.arbetsförmedlingen.se/

Doorashada waxbarashadeed ee gaarka kuu ah.
Maxay waxbarashooyin kaladuwan oo aad kala doorankartid ay kuugu talagaleen iskuuladu? Waxaad ogsoonaataa in fursadaha ah in aad lahaan kartid in aad kala dooratid waxbarashooyin ey kuxidhantahay marba waxa ay wax barashadaadu ay tahay.Waxbarashooyin habka gaarka ah looqorsheeyey ama waxbarashoyinka ugaarka ah dugsiyada baraayfadka /xorka ah malaha fursadaha ah in ardaygu uu yeelan karo doorashooyin uu doorankaro waxbarashada uu doonayo ahna sida waxbarashada guud ee iskuulada degmooyinka. Run ahaantii ma aha in qalad laga fahmo laakinse waa wax u baahan in la sii ogsoonaado.

Waxaad raadisaa oo aad ogaataa waxaka danbeeya ama ku qarsoon kan ”heersare” takhasuska uu iskuulku uu doonayo in uu ku siiyo. Imisa casharo waxbarasho iyo imisa dhibcadood ayaad helidoontaa run ahaantii? Iyo carsharadee ayaadan u baahneen?
Haddii aadan ishubin, waxaad aad dib udhigankartaa go aanadaada? Dooro waxbarasho dugsiyeed, iyo iskuul aad dooneysid in aad ka dhigatid waxbarasho takhasus ah, iyo mid dheeraad ah. Ugu horeen waxbarasho sanadeedka 2 ama 3. Markaas kadib waxaad heysataa wakhti yar oo aad wax ku kala ogaatid.

Luqada
Luqadahee ayaad iskuulka ka barankartaa? Luqadu waa wax aad u faa ido badan, taas oo aad isticmaali kareysid, una baahnaan kartid noloshaada oo dhan . Waxaad ogsoonaataa waxabarashooyinka sare ee aad ku dhigatid luqada ingiriisiga ,iyo afafka kale ee casriga waxa ay ku siinayaan buundooyin ama dhibco sare, marka aad dooneysid in aad wax barashadaada aad sii wadatid ilaa iyo heer jaamacadeed mid ah, sida sanad dugsiyeed ka 2010.

Dadaal horumar siisamee!
Sida ay daraasadaha lasameeyey ey xaqiijiyeen, dadka shaqooyinka aad u hooseeya kashaqeeya, waxa weeye dadaka aan dugsyadasare kabixin ama wax barashadooda aan dhameysanin. inkastoo aysan aheen wax sahalsan mar-marka qaarkood.Waxaad xooga saartaa oo aad ku dadaashaa sidii aad shahaado dugsi sare ah aad u qaadan lahayd, ama waxbarashadaada dugsigasare aad u dhameysan laheyd. Waxaad weydiisataa caawimaad, haddii ay daruustu ay kugu badato wixii aad ka yeeli lahayd,kalatasho macalinka kamasuulka ka ah galaaskaaga,ama masuulka u qaabilsan waxbarashada dugsiyada ee jooga iskuulkaaga(studie- och yrkesvägledaren) ama macalin ka mid ah macalimiintaad wax kuudhiga ka aad ku kalsoontahay.